



Somali Ministry of  
Education, Culture and  
Higher Education



Somali Academy of  
Sciences and Arts



United Nations  
Educational, Scientific and  
Cultural Organization

**SUSTAINABLE  
DEVELOPMENT  
GOALS**

[unesco.org](http://unesco.org)

# Maxay muhiim ugu tahay Soomaaliya ineey yeelato Istaraatijiyyad Dhaqan ee Heer Qaran?

**▲XC**

ARTXCHANGE  
CONNECTING  
CREATIVE YOUTH  
IN AFRICA AND EUROPE

@artxchangeproject



[cisp-som.org](http://cisp-som.org)

WADA MAAL GALIYAY:



European  
Union



AU-EU Youth  
Cooperation  
Hub

## Waa maxay istaraatijiyyad/ ama xeelad dhaqan?

In qaran ama dawladi yeelatao Istaraatijiyyad dhaqanka waxay ka dhigan tahay in dawladu lededahay siyaasad taas oo ay ku soo bandhigto qabka iyo aragtida guud ee la xiriirta horumarinta dhaqanka ee heer degmo, heer qaran, ama heer caalamiya. Himilada istaraatejiyada dhaqanka ee soomaaliya waa in la hormariyo firfircooni danwaaxda dhaqanka Soomaaliya taas oo gacan ka gay-sata wada noolaanshaha bulshada, ka shaqaynta nabada, iyo sidoo kale horumarka waara, iyadoo loo marayo wadahadalo isdhexgalka dhaqanka heer qaran iyo heer caalami ahba.



## Istaraatijiyyada dhaqanku maxay muhiim u tahay?

Istiraatijiyyada Dhaqanka Soomaaliya iyo Qorsho Hawleedka la xiira waxay hagi karaan soo noolaynta waaxda dhaqanka Soomaaliya si ay uga qayb qaadato; nabadda, dib u heshiisiinta iyo sharciga, horumarinta bulshada iyo dhaqaalaha, iyo sidoo kale ilaalinta noolayaasha kala duwan ee u gaarka ah iyo kobcinta kala duwanaanta dhaqnkeeda.

Istaraatijiyyada waxay sidoo kale gacan ka gaysataa in dhaqanka lagu lamaaniyo dhamaan siyaasadaha hormarinta haday tahay kuwa khuseeya tacliinta, sayniska.

## Iyaabaha looga qaybqaadan karo?

- Ka qayb qaado wada tashiyda caalamiga ah ee ay qaban qaabisay wasaarada waxbarashada hiddaha iyo tacliinta Sare.
- Inaad baratid waxyaabaha la xiriira dhaqanka Soomaalida.
- Kor u qaadida wacyi galinta qaybaha kala duwan ee daneeya dhaqanka.
- Lawadaagida taladaada iyo ra'yigaaga email: [info@moe.gov.so](mailto:info@moe.gov.so).

## Dhaqanka Soomaalida

Soomaaliya waxay leedahay hidyo iyo dhaqan kaladuwan haday tahay goobo dhaqan iyo kuwo dabiici ah hab dhaqanka, madxafyo iyo dhaxal hiddo ee biyaha hoose iyo sidoo kale qaybta dhaqanka iyo halbuurka.



## Soomaaliya: waxaa loogu yeeraa dhulkii abwaanada gabayga

Soomaalidu waxay leedahay dhaqan sugaaneed ilaa iyo qarnigii 12aad kaas oo u sii gudba jiilba jilka ka danbeeya. In kastoo xiliyadii hore badanaa ay odayaashu adeegsan jireen gabayada, balse wayaadan waxaa lagu dhiiri galay inay dhalinharadu hormariyaan hibadooda hala-abuurnimo.

## Bandhig faneedkasoo saarka Filimada

Tan iyo qarnigii 20aad masraxa tiyaatarku wuxuu ka mid ahaa dhqanka Soomaalida. Kadib Soomaaliya markay qaadatay xoriyadda sanadkii 1960, Soomaalidu waxeey sameeyeen riwaayado. Sidoo kale waxay bilaabeen shirkado soo saara, filimadooda waxayna gaarsiiyeen wadamo kale duwan, intaa kadib waxay magaalada Muqdisho ka bilabeen bandhig filimada caalamiya oo sanadle ahaa.

Dhaqanku wuxuu wax ku biirin karaa Hormarka waara ee Soomaliya

Xoojinta waaxda dhaqanka Soomaaliya waxay samayn badan ku yeelan doontaa:

- Dhiirigalinta bulshada rayidka ah, ka caawi-naya in ay noqdaan wakiilo ka shaqeeya daaalada lagu wado in la dhiso bulsho hufan oo dimuqraadi ah.
- Soo noolaynta kaabayaasha dhaqanka iyo sidoo kale ilaalinta hantida dhaqanka.
- Si guud in kor loogu qaado ilaalinta iyo ixtiraamka xuquuqda aadanaha, gaar ahaan xoriyadda hadalka.
- Xoojinta iyo fahamka dhaqanka Soomaaliyeed iyo xushmaynta kala duwanaansha dhaqamada kale.
- Dhisidda goobo suurto galinya in dakhli kaso gali karo wadanka sida goobo dalxiis oo dhaqaale laga samayn karo iyo dhaqaalaha hal-abuurka.

Shirkadaha dhaqanka iyo hal- abuurku waxay dhaqaale ahaan ka dhigan yihiin **2,250 bilyan** oo doolar, waxay abuuraan in kabdan **30 milyan** oo shaqo caalmaka, waxayna shaqaalay siiyaan dad badan oo da'doodu u dhaxayso **15 ilaa 29.**



## Awooda dhaqanka

Aduunkan maanta isku wada xiran awoodda uu dhaqanku u leeyahay inuu wax ka bedelo bulshooyinka waa mid iska cad. Astaamaha kala duwan ee dhaqanka sida dhismayaasha taariikhiga ah sida madxafyada, caado dhaqameydyada soo jireenka ah iyo farshaxanka casriga ahba waxay nolasheena kusoo kordhin karaan faa'iido badan oo xad laheyn.

Hiddaha ayaa ah isha mideysa bulsho heybteeda iyo ahaanshaheeda, gaar ahaan bulshooyinka ay saameeyeen khilaafyo iyo daganaansho la'aan dhaqaale. Hal-abuurku wuxuu gacan ka gaystaa dhismaha bulsho furfuran, loo wada dhan yahay oo wadajirta. Hiddaha iyo hal-abuurka labaduba waxay aasaas u dhigaan bulsho firfircooni, barwaaqeeysan oo alifaad iyo aqoon leh.





## | Soomaaliya & UNESCO

- Hoyga dhaqanku waa wasaarada waxbarashada, hiddaha iyo tacliinta sare.
- 2020 kii Soomaaliya waxay ansaxisay heshiiskii UNESCO 1972 ee Hiddaha Adduunka iyo Heshiiskii UNESCO 2003 Hiddaha iyo dhaqanka ee aan la taaban karin.
- 2020 kii kadib 30 sano oo ay xirnayd xaruntii dhaqanka ee Soomaaliya madaama lagu jiray dagaal sokeeye, Soomaaliya waxay nasiib u yelatay inay u dabaal degto dib u furustii Madxfakii Qaranka, Masraxii Qaranka iyo waliba Makatabdii Qaranka.
- Ayadoo la raacayo heshiisyadaan, Soomaaliya waxaa lagu dhiiri galinaya inay aqoonsato oo ay ilaalso hiddo dhaqameedkeeda la taaban karo iyo waliba kan aan la taaban karin, ayadoo la hubinaayo gaarsiinta jiilalka danbe.





## | Shirarkii Heshiisyada UNESCO

**1954**

Shirwaynihii Badbaadinta  
Hantida Dhaqanka hadii ay  
dhacdo Colaad isku dhac  
Hubeysan leh.



**1970**

Shirwaynihii lagu heshiyyay  
ka Hortaga iyo Mamnuucida  
Dhoofinta iyo Soo dajinta  
Sharci darada ah sidoo kale  
wareejinta Mulkiyada Hanti-  
da Dhaqanka.



**1972**

Hishiis ku saabsan ilaalinta  
hiddaha iyo dhaqanka dha-  
maan aduunka.



**2001**

Hishiis ku saabsan Ilaalin-  
ta Hiddaha iyo Dhaqanka  
Dhaxalka ah ee Biyaha  
Hoos ku Jira.



**2003**

Hisshiis ku saabsan Badbaadin-  
ta Hiddaha iyo Dhaqanka aan  
la taabin Karin.



**2005**

2005 Hishiis ku saabsan Ila-  
alinta iyo Dhiirrigelinta kala  
duwanaanshaha muujinta  
dhaqanka.

